



TILMAAN KU AADAN nidaamkaaga daawaynta bulaacada




Inta badan dadka deegaanka ayaa walaac ka qaba nadiifinta marinnaadeena biyaha. Xaqiiqdii, xog aruurino laga sameeyay Ismaamulka San Diego ayaa muujinaaya **in ka badan 50% dadka deegaanku ay aaminsan yihiin in wasaqda gasha ceebaheena, harooyinka, iyo balida ay si toos ah u saamayso ayaga iyo qoysaskooda.** Barnaamijka Difaaca Waraha Biyaha ee Ismaamulka San Diego ayaa ka taageeraaya dadka deegaanka dedaaladooda kahortaga wasaqda biyaha asagoo siinaaya tilmaamaha soo socda ee ku aadan sida dhismuhu u daryeelaayo nidaamka daawaynta bulaacada.

Nidaamka Daawaynta Bulaacada

Nidaamyada Daawaynta bulaacada ayaa daareeya biyaha wasaqda ah, kuwaasoo ay ku jiraan biyaha musqusha, dhaq dhaqaalka, shaawarka, iyo biyaha siinka, ee guriga ka yimaada kahor intaan lagu fasixin dhulka.



Hawsha nidaamkaaga daawaynta bulaacada ayaa ka badan taangiga qabta biyaha. Nidaamkaaga daawaynta bulaacada ayaa ka samaysan afar qaybood oo muhiim ah:



Kahortag Fashilka


Haddii aan nidaamkaaga daawaynta bulaacada si sax ah loo maarayn, fashil ayaa ku imaan kara, taasoo kugu keenaysa qarash badan iyo sumaynta deegaankeena maxaliga ah. Si aad u maarayo nidaamkaaga daawaynta bulaacada aadna uga hortagto fashil dhaca, raac Farsamooyinkaaan ugu fiican ee Maamulka (BMP-yada):



Qashinka ama haraaga wasaqda cuntada. Wasaqda aadka u badan ee cuntada ayaa ka dilaci karta bacteeriyyada inay burburiso waxyaabaha adag ee galaaya taangiga daawaynta bulaacada.



Agabka wasaqda ah ee adag sida agabka nadaafada, kubadaha suufka ah, suufka ilmaha lagu tirtiro, iyo suufka la falaasho maadaama waxyabahaan aysan burburayn ayna xiri karaan tuubooyinka. Keliya xaashida musqusha ayaa geli karta nidaamka sifaynta bulaacada.



La soco biyaha galaaya nidaamka Biyaha xad dhaafka ah ayaa ku riixi kara waxyabaha adkaha ah marinnda bulaacadaada, taasoo aburaysa awmid keenaysa in nidaamku fashilmo.



Gee kiimikooinka xarunta deegaanka ee aruurinta qashinka khatarta ag ee guryaha (www.wastefreesd.org) halkii aad ku ridi lahayd nidaamka bulaacada qaada. Kuwaan waxaa kamid ah nadiifiyaasha, warankiilada, iyo daawooyinka la nacay. Ha adeegsan waxyaabaha kiimikada lagu daro maadaama nidaamka bulaacada qaada uusan u baahnayn in lagu daro kiimiko si uu shaqo fiican u qabto.



Si joogto ah ugu bam garee taangigaaga adoo adeegsanaaya xirfadlaha bam garaynta nidaamka bulaacada oo ruqsad haysta. Inta jeer ee aad bam garanayo ayaa ku xiran xajmiga taangigaaga iyo tirada dadka ku nool guriagaaga. La tasho xirfadle si loo go'aamiyo inta jeer ee ku haboon in agabka guriagaaga la bam gareeyo. Si aad u hesho qiyaasaad guud, arag bogga danbe.

Inta jeer ee La bam baraynaayo (inta sanadood)

Tirada dadka qoyska – Tirada Dadka Guriga Jooga

Xajmiga Taangiga Bulaacada	1	2	3	4	5	6	7	8	9	10
1000 galaan	12	5½	3½	2½	2	1½	1	1	1	1
1250 galaan	15½	7½	4½	3	2½	2	1½	1	1	1
1500 galaan	19	9	6	4	3	2½	2	2	1½	1
2000 galaan	25	12	8	6	4½	3½	3	2½	2	2

La tasho xirfadle si loo go'aansho inta jeer ee ku haboon in agabka gurigaaga la bam gareeyo.

Xalinta Ciladaha

Cilada ayaa lagu aqoonsan karaa:



Bulaacd banaanka u soo baxday oo ka timid tuubada ama taangiga bulaacada



Qaybha caaryo cagaaran ama geedo aad u baxaaya oo saaran aaga tuubada




Tuubooyin bulaacada tartiib u qaada ama tuubooyinka bulaacada ku soo celinaaya guriga


Haddii aad ogaato wax kamid ah ciladahaan fashilka nidaamka bulaacada, wac isla markaba xirfadle si uu kuu caawiyoo Si aad iskaga ilaalisana dhibaatooyin dheeraad ah raac tilmaamahaan ilaa caawimaadu kusoo gaarto:



Isticmaal biyaha ugu yar ee suuragalka ah ilaa inta dayactirka laga samaynaayo



Ka ilaali dadka ama xoolaha inay u dhawaadaan aaga wasaqda adoo xarig ama difaac ku wareejinaaya



Ka ilaali biyaha wasaqaysan inay ka baxaan meesha adoo ku xiraaya waxyaabaha celiya sida jawaano ciid ah oo aad dhigto aaga tuubadu ka xirantay



Biyaha lagu siidaayo wadooyinka, mijaroorada, iyo biyaha daadka raabka ee Ismaamulka San Diego AYAAN LA DAAWAYN kahor intaysan gelin waraha deegaankeena, webiyada, io badwaynta. Dhammaan ilaha wasaqda, ayna ku jiraan wasaqda ka timaada nidaamka bulaacada qaada, ayaa mamnuuc ka ah inay ka baxaan gurigaaga ayna galaan biyaha wadooyinka ama daadka roobka. Keliya biyaha roobka ayaa loo oggol yahay inay maraan wadooyinka iyo kanaallada daadka.



Si aad u hesho Xog Dheeri ah

Xogta nidaamka bulaacada iyo su'aalah la xariira farsamada:
(858) 565-5173
www.sandiegocounty.gov/deh/septic

Barnaamijka Qiimo Dhimista Nidaamka Bulaacada ee Barnaamijka Difaaca Waraha Biyaha:

www.sandiegocounty.gov/WatershedRebates
and click on Septic Rebate Program